

## Macluumaad guud oo ku saabsan tallaalada

Tallaalada loogaga hortagayo fayruska koronahu waxaay ka socdaan Tampere Finland dhammaan dadka ka wayn da'da 16 sano waxaay fursad u haystaan inay qaataan tallaalka koronaha. Tallaalka koronuhu waa lacag la'aan waxaana la bixiyaa labo jeer. Qaadashada tallaalku khasab ma aha.

Tallaalada isla hal nidaam ayaa Finland oo dhan lagu bixinayaa. Sida loo kala horreeyaa waa:

1. Marka u horeysa waxaa tallaalka helaya kalkaalisoooyinka iyo dhakhaatiirka daryeelaya bukaanada koronaha qaba ama waayeelka.
2. Markaas kadib waxaa tallaalka la siinayaa dadka fayruska koronuhu uu halis ku noqon karo. Kooxaha nuglaanta dheeraadka ah leh ee noocaas ah waxaa ka mid ah waayeelka iyo dadka muddada dheer xanuunsanaa.
3. Dadka qaangaadhka ah ee kale waxaa la bilaabayaa in la talaalo kaddib, marka dadka waayeelka ah iyo kuwa ku jira kooxaha dadka nugul aay helaan tallaalka.

Tallaaladu waxaay imanayaan Finland iyo Tampere iyaga oo cadadkoodu yaryahay. La soco bogga [www.tampere.fi/covid19vaccinations](http://www.tampere.fi/covid19vaccinations). Halkaas ayaad ka heli kartaa macluumaadka goorta aay tahay wakhtiga aad adigu heli karto tallaalka. Latalin luqadaada ku socota ayaad sidoo kale ka heli kartaa [koronabotti](#) aaladda la yidhaahdo ee ku jirta bogga [tinyurl.com/coronabott tampere](http://tinyurl.com/coronabott tampere).

